



MINNEAPOLIS  
PUBLIC SCHOOLS

Urban Education. Global Citizens.

1250 Galbeedka Wadada Broadway.  
Minneapolis, Minnesota 55411  
Email: Michael.Thomas@mpls.k12.mn.us

Michael Thomas  
Madaxa Sare ee Dugsiyada

Ogosto 1, 2016:

Qoysaska Sharafta leh ee Barton:

Marka hore waxaan doonayaa inaan idiinka mahad celiyo fursanad midkasta oo idinka mid ah sida aad ugu xiran tihiin dugsiiga bulshada ee Barton. Sida aad ugu dhiirateen inaad nala wadaagtaan fikirkiina. Dugsiyada Dadweynaha Minneapolis waxaa ay aad u ixtiraamaan wixii fikrado iyo walaac ah aad qabtaan si wax looga qabto. Waxaana muhiim ah inaad ogaato in lagu maqlay Lana tixgalinayo waxii go'aano ah ee dugsiiga Barton.

Marka xiga waxaa doonayaa inaan idiin muujiyo sida aan ugu qanacsanahay sida ay wax noogu bidhaamiyeen ururka Cadaalada bulshada kaas oo noo qiimeeyey dhacdooyinkii ka jiray dugsiiga Barton. Sida aad noogu soo kordhiseen aragtida qiimaha weyn u leh xalinta mashaakilaadka waxbarashada bulshada iyo deegaanka.

Waxaan aaminsanahay muranka hada ka jira dugsiiga Barton, inuu ka imaanayo arimo dhinacyo badan leh una baahan in lagu xaliyo dhexdhexaadin iyo isu fiyoobi. Laakiin inta badan waxaa si gooni ah uga shaqeynaya xalinta arintan, madaxda xafiiska dhexe oo abuurayo nidaam aan dhaawicaynin waxbarashada bulshada. Taasina maaha mid aad u sahlan laakiin waxaan xaqiijin doonaa in lala xisaabtami doono hadii ay arimahaan oo kale ku soo noqdaan mustabalka dugsiyadeena.

Waxaan aaminsanahay ruux walba oo dugsiiga Barton ka mid ah, xitaa hadii ay isku qilaafsan yihiin arimo kala duwan in ay doonayaan xalinta iyo horumar wanaaga dugsiiga. Haddii aan doonayno in natiijo wax ku ool ah la gaaro waxa haboon inaan isweydiino su'aalo dhowr ah:

Maxay tahay faa'iidada iyo dhibaataada naga soo gaareyso ficiladeena, maxaanse ku badali karnaa oo aan wanaag ku heli karno guud ahaan? Maxay tahay xaq ay yeelan doonaan kuwa ku lugta leh si loo dhowro xaquuqdooda iyo si loogu soo dabaalo arimahan guul iyo horumar wanaag la isla wadaago?

Jawaab uma heli karo hada su'aalahaas oo idil. Laakiin waxaan ku kalsoonahay in la wada shaqeeyo si loo gooro xal maamuus u leh dugsiiga bulshada Barton. Taas oo u horseedi doonta cadaalad iyo xalinta dhibaatooyinka.

Waxaa farxad ah in loo doortay Jonas Beugen maamulaha dugsiiga Clara Barton Open, si uu ugu horseedo horumar, waxaa ka go'an in uu kor usoo qaadayo dugsiiga Ardayda iyo shaqaalahaba. Anigana waxaan kor kala socon doonaa maamulka Jonas Beugen sanad dugsiyeed kan soo socda ee 2016-2017, waxaana ku wargalinayaa in xafiiskeyga iyo hogaamiyeyaal kaleba ay la shaqeyn doonaan si uu ugu guuleysto howshiisa una gaarsiiyo ardayda horumar sida horayba looga bartay, Jonas ayaa ku hanweyn in la iska kaashado xalinta mashaakilaadka, isaga waxaa uu qibrad weyn u leeyahay xalinta dhibaatooyin ah ee ku saleysan dugsiyada.

Waxaa iga go'an in uu xiriirkeena bilowday si wada jira ah waxaan u abuuri doonaa xiriir iyo wada hadal joogto ah, si aan u hubiyo inaad heshaan xogta dhabta ah aniguna aan codsiigiina maqlo. Tani waxay u gogol



MINNEAPOLIS  
PUBLIC SCHOOLS

Urban Education. Global Citizens.

---

xaareysaa xog ururinta shirarka iyo kalfadhiyada soo socda. Mana balan qaadayo in aan ruux walba uu raali ka noqon doono go'aamadeena.

Waxaan hubinaynaa aniga iyo Maamulaha Beugen in uu dugsiga Barton sii socdo uuna noqdo dugsi qiimo u leh bulshadiisa had iyo jeer.

Mar kale waxaan si sharaf leh ugu baaqayaa qoysaska sharafta leh ee dugsiga Barton, inay kasii mid ahaadaan dugsiga iyo waxbarashada caruurtooda. Fadlan wixii warbixino dheeraad ah aniga xageyga, ka eegta talaabooyinka muujinayo xaga geedi socodka xalinta waxbarashada bulshada barton. Qorshaeygu waa inaan la kulmo waalidiinta iyo shaqaalaha todobaadka soo socda ee taariiqdu tahay bisha ogosto 8eeda. waad mahadsan tihiin

Daacadle,

Michael Thomas  
Madaxa Sare ee Dugsiyada  
Dugsiyada Dadweynaha ee Minneapolis